

## Ogaysiiska Kahortagga Cunsuranimada

Washington State Board of Health (Guddiga Caafimaadka ee Gobolka Washington) (Gudiga) wuxuu u hogaansamayaa shuruucda qabanaysa ee xaquuqaha bulshada ee heer federaal iyo heer gobolba kuwaas oo ku saabsan kahortagga cunsuranimada. Ma cunsuriyadayno mana faquuqno dadka anaga oo ku salaynayna isirkooda, midabkooda, diintooda, waddanka ay asal ahaan kasoo jeedaan, maraxaldooda soogalootinimada ama muwaadinimada, da'dooda, naafanimadooda, jinsigooda, muuqaalka iyo aqoonsiga jinsigooda, rabitaankooda nooca galmada, marxaladooda guurka, marxaladooda qoyska, diintooda, marxaladooda sharafta halyaynimo ama milatari, ama adeegsiga tilmaamaha eey tababaran ama adeegyada xayawaanka ee uu adeegsado qofka naafada ah.

## Adeegsiga

Waxaad codsan kartaa in aad si macquul ah ku hesho barnaamijyadeena, adeegyadeena, kulamadeena, iyo howlaheena. Washington State Board of Health (Gudiga):

- Wuxuu dadka naafada ah siiyaa kaalmo iyo adeegyo bilaash ah si ay nooga caawiyaan in aan si wanaagsan kuula soo xiriirno, sida:
  - Tarjumaanada luuqadda dhagooleyaasha oo ay bixinayaan xirfadleyaal
  - Macluumaad qoraal ah oo qaabab kale ah (xarfaha waaweyn, dhegaysi, qaab elektoroonig ah oo la adeegsan karo, ama qaabab kale)
- Wuxuu dadka luuqaddooda koowaad aysan Ingiriisiga ahayn siiyaa adeegyo luuqadeed, sida:
  - Tarjumaano xirfadleyaal ah
  - Macluumaad ku qoran luuqaddaada

Ma u baahan tahay adeegyadaan, wac (360)-236-4110 ama iimayl u dir [wsboh@sboh.wa.gov](mailto:wsboh@sboh.wa.gov)

## Helitaanka iyo Americans with Disabilities Act (ADA)

Guddiga Caafimaadka ee Gobolka Washington (Guddiga) waxaa ka go'an in uu macluumaad iyo adeegyo ay heli karaan uu siiyo dadka naafada ah. Waxaanu bixinaa qaabilaado macquul ah, waxaanna ku dadaalnaa sidii aan uga dhigi lahayn dhammaan kulamadeena, barnaamijyadeena, iyo howlaheena kuwo ay heli karaan dhammaan dadku, ayada oo aan loo eegayn awooddooda, si waafaqsan dhammaanba shuruucda khuseeya ee federaalka iyo kuwa gobolka.

Hay'adeena, websaytkeena, iyo adeegyadeenna onlenka ah waxay raacayaan xeerarka Naafada Maraykanka (Americans with Disabilities (ADA), Farqada 508 ee Xeerka Dhaqancelinta ee soo baxay 1973 (ection 508 of the Rehabilitation Act of 1973), Siyaasadda Gobolka Washington 188 (Washington State Policy 188), iyo Tilmaamaha Helitaanka Macluumaadka Websaytka (Web Content Accessibility Guidelines) ((WCAG) 2.0, heerka AA). Waxaanu si joogto ah ula soconaa u hogaansanaanta waxaana isticmaaleyaasheena ku casuunna in ay noo soo gudbiyaan codsi haddii ay u baahdaan kaalmo dheeraad ah ama ay jeclaan lahaayeen in ay nagu wargaliyaan arrimaha ku saabsan horumarinta adeegsiga nidaamka.

Waxaan naga go'an in aan u ogolaano adeegsiga dhammaanba shakhsiyaadka soo bookhanaya websaytka hay'adeenna, oo ay kujiraan hakhsiyaadka naafada ah. Haddii aadan adeegsan karin macluumaad websaytkeena kujira ayada oo ay sabab u tahay naafanimu aad qabto, aad qabto su'aalo ku saabsan adeegsiga macluumaadka ama aad jeclana lahayd in aad noosoo gudbisno dhibaatooyin ku saabsan adeegsiga macluumaadka websaytkaan kujira, fadlan wac (360) 236-4110 ama iimay u dir [wsboh@sboh.wa.gov](mailto:wsboh@sboh.wa.gov) kuna faahfaahi tafaasiisha soo socota farriintaada:

- Nooca baahida adeegsiga
- URL-ka (ciwaanka websaytka) uu kujiro macluumaadka aad jeclaan lahayd in ada hesho
- Macluumaadkaaga xiriirka

Waxaanu dadaal kasta ku bixin doonnaa sidii aan kuu siin lahayn macluumaadka aad codsatay una sixi lahayn wax kasta oo ah cillad dhanka hogaansanaanta ah oo websaytkeena kajirta.

## **La xiriir Isuduwaheena ADA**

Maareeyaha Xiriirka

Washington State Board of Health

(360) 236-4110

[wsboh@sboh.wa.gov](mailto:wsboh@sboh.wa.gov)

Isticmaalayaasha TTY waxay wixi karaan 711

## **Soo gudbi cabasho ama ashtako laa xiriirta ADA**

Xaafiiska soo socda ayaa loo qoondeeyay in uu qabto su'aalaha iyo cabashooyinka ku saabsan eedaha cunsuriniimada. Waxaad so gudbin kartaa ashtako haddii aad rumaysan tahay in Guddiga Caafimaadka Gobolka Washington uu ku guuldarraystay uu ku siiyo adeegyadaan ama uu si kale kuu cunsuriyadeeyay asaga oo ku salaynaya isirkaaga, midabkaaga, diintaada, waddanka aad asal ahaan kasoo jeedo, maraxaldaada soogalootiniimada ama muwaadinimada, da'daada, naafanimadaada, jinsigaaga, muuqaalka iyo aqoonsiga jinsigaaga, rabitaankaaga nooca galmada, marxaladaada guurka, marxaladaada qoyska, diintaada, marxaladaada sharafta halyaynimo ama milatari, ama adeegsiga tilmaamaha eey tababaran ama adeegyada xayawaanka ee uu adeegsado qofka naafada ah:

Washington State Department of Health

Office of Civil Rights, Equity and Social Justice

Attn: Title VI Coordinator

PO Box 47890 Olympia, WA 98504-47890

[Civil.Rights@doh.wa.gov](mailto:Civil.Rights@doh.wa.gov)

Waxaad ashtako ku saabsan cunsuriniimada kusoo gudbin kartaa si fool-ka-fool ah ama boostada, faakiska, ama iimayl.

Waxada sidoo kale ashtako xaquuqda madaniga ah u gudbin kartaa U.S. Department of Health and Human Services, Office for Civil Rights (U.S. Waaxda Cadaaladda Caafimaadka iyo Adeegyada Bulshada ee Maraykanka), Office for Civil Rights, si elektoroonig ah adiga oo usii marsiinaya Barta Civil Rights Complaint Portal, oo lagu heli karo <https://ocrportal.hhs.gov/ocr/portal/lobby.jsf> (Ingiriisi), ama boostada ama telefoonka halkaan:

U.S. Department of Health and Human Services

200 Independence Avenue, SW

Room 509F, HHH Building

Washington, D.C. 20201

1-800-368-1019, 800-537-7697 (TDD). (Caawimaad luuqadeed ayaa la heli karaa)

Foomamka cabashada waxaa laga heli karaa <http://www.hhs.gov/ocr/office/file/index.html> (ayaga oo Ingiriisi ku qoran).

**Lifaaqyada La xiriira:**

Siyaasadda Qarsoonaanta xogta (oo [Ingiriisi ah](#); isbaanish ah)

Ogaysiiska Americans with Disabilities Act (oo ku qoran [Ingiriisi](#); ku qoran [Isbaanish](#))